# MCES Baadhitaanada Fayodhawrka Bulaacadaha ee Gobolka

## Guudmarka Mashruuca

Metropolitan Council Environmental Services (MCES), Howlwadeenka shabakada biyaha wasakhda ah iyo nidaamka daweynta ee aagga metrooga, ayaa hadda bilawday mashruuca baadhitaanka fayodhawrka bulaacadaha ee gobolka. Waxaan ka duubaynaa fiidiyow gudaha MCES tuubooyinka bullaacadaha si aan u diiwaangelino xaaladooda taas oo naga caawinaysa inaan go'aan ka gaadhno haddii la dayactiri karo ama la badali karo iyo goorta. Shaqadan waxaa loo samaynayaa iyadoo lagu ridaayo kamarad robot ah tuubooyinka bulaacadaha iyadoo la adeegsanayo godka dayactirka.

## Saamaynta Dhismaha

In kaste oon ku dadaalayno inaan yarayno saamaynta xiliga baadhista, dhib ku kooban ayaa dhici karta xiliga shaqada, kuna jiraan:

- Buuq
- Ur
- Shaqaalaha ka shaqaynaya waddada iyo MCES isticmaalka daaradaada. Fadlad xawaare hoose ku soco taxadarna muuji.

## Xidhiidhka Mashruuca

Dadka degan inta ku dhereran dariiqa baadhista waxay heli doonaan warqad sharaxaysa mashruuca.

Haddii ay shaqaaluhu u baahdaan inay galaan daarad si ay galaangal ugu helaan Councildaarada, shaqaaluhu Council waxay isku dayi doonaan inay la xidhiidhaan degenaha ka hor. Tani waxay dhici doontaa ku dhawaad markay shaqaaluhu ku dhawyihiin goobta, waxanu jeclaanlahayn jawaab degdega iyo in degenayaashu nala shaqeeyaan.

Magaaladaada waa lagu wargaliyay shaqadan. Waxanu dhiirigalinaynaa in dhamaan faalooyinka iyo su'aalahaba lagu hagaajiyo MCES tiimka mashruuca adoo adeegsanaya macluumaadka xidhiidhka ee hoose.

## Waxbadan Ka Ogow

**Khadka Tooska ah:**
(651) 236-9841

**Iimaylka:**
info@mcessewerinspections.com

**Wabsaytka:**
metrocouncil.org/sewerconstruction/inspections

### HANAANKA BAADHISTA

**1** Metropolitan Council qandaraaslayaashu waxay baadhi doonaan MCES fayodhawrka tuubooyinka bulaacadaha magaaladaada ayadoo la adeegsanayo godadkii hore u jiray ee dayactirka Metropolitan Council.




**2** Gaadhi adeeg oo loogu talogalay inaanu dhaawicin dhulka ayaa loo adeegsan doona in lagu gaadho gododka dayactirka ee wadooyinka aan laamiga ahayn.



**3** Shaqaaluhu waxay ku laalaadin doonaan kamarad godka dayactirka ee bulaacada. Kadib waxay dhex socon doonta MCES tuubooyinka bulaacada ayadoo duubaysa xaalada tuubada.

METROPOLITAN COUNCIL